

Waalidiinta iyo maalgeliyaasha sharafta mudanoow,

_____ qabanqaabinayaa _____ barnaamijka socodka Unicef (UNICEF-kävelyn), Kaasoo ay ardaydu qaab isboortis ahaan ah ku caawin doonaan carruurta waddamada soo koraaya.

Ku soo dhawaada maalgelinta isboortiga ee ay ardaydu samaynaayaan! Sannad dugsiyeedkaan, socodka Unicef ee aadka loo jecel yahay waxaa uu buuxiyay 20 sano. Ujeedada laga leeyahay socodka Unicef, waa si la mid ah sida shaqada UNICEF, waxaa ay ku salaysan yihiin heeshiiska qaramada midoobay ee xuquuqda carruurta. Bisha Nofembar sannadka 2019 ayaa anisxintii heshiiska waxaa ka soo wareegaysa muddo 30 sano ah. Mahad diirran naga gudooma dadka ardayda ehelkooda ahoow, kuwaasoo u taagan horumarinta xuquuda carruurta, iyagoo aan daalayn oo adeegsanaya tartanka socodka UNICEF ama qaabab kaleba.


Sannad dugsiyeedkaan waxaa ardayda, maalgeliyayaasha (sponsorit) iyo UNICEF ay si wadajir ah u caawin doonaan carruurta wadamada Malaawi iyo Koonfur Afrika, sidii ay ku heli lahaayeen waxbarasho asaasi ah oo tayo wanaagsan leh, iyo si ay u hirgasho xuquuqda ilmo kasta ee ah in uu iskuul dhigto. Taageerada laga helo barnaamijkan socodka UNICEF waxaa lagu tababarayaa macallimiinta, waxaa lagu soo iibinayaa qalabka waxbarashada iskuulka, waxaana lagu horumarinayaa ka qaybqaadashada carruurta ee go'aannada iskuulku uu gaarayo. UNICEF waxaa ay u shaqaynaysaa si dhabaradayg ama adkaysi leh, iyadoo ka khabiir ahaanna saamayn ku yeelanaysa dadka go'aan gaarayaasha ah, si iskuul walba uu ardayda ugu noqdo mid tayo wanaagsan oo ammaan ah.

Nagala soo qaybgal sidii aan ku hirgalin lahayn xuquuqda carruurta!

Naga gudooma salaan diirran,
Shaqaalaha iskuulka iyo UNICEF

Socodka UNICEF oo la soo koobay

- Dhacdada kahor ardaydu waxaa ay dadka ehelkooda ah ama ku dhow-dhow ka raadsan doonaan maalgelin (isboonsar), kuwaasoo u ballanqaadi doona in ay ugu deeqaan cadadka lacagta ah ee ay doorteen, natiijada isboorti kasta ee uu ardaygu sameeyo. Ardaygu waxaa sidoo kale uu barnaamijka la qabanaayo kaga qayb qaadan karaa maalgelin la'aan.
- Maalinka howshu ay dhacayso waxaa ardaydu ay heli doonaan istiikar loogu dhajin doono kaarka socodka ee UNICEF, kaasoo la siin doono mar kasta oo ay sameeyaan qayb isboortiga ka mid ah iyo khibradda dhabta ah ee falalka ay samaynaaan iyo sida ay saamaynta ugu yeelan karaan dunida ku hareereysan.



Daawo fiidiyowgaan ka sheekeynaaya gabadha la yiraahdo Xaliima ee 12 sano jirka ah, taasoo iskuulkii dib ugu laabatay: www.unicef.fi/halima

- Marka ay howshii maalinkaa la qabanaayay dhammaato, waxaa maalgeliyayaashu ay bixin doonaan lacag u dhiganta inta istiikar ee uu ardaygu haysto, waxayna lacagtaas oo ku jirta baqshada maalgelinta u dhiibi doonaan ardayga, ama waxaa ay si toos ah ugu shubayaan UNICEF.

Macluumaad dheeraad ah: www.unicef.fi/unicef-kavely

Macluumaadka ku saabsan oggolaanshaha lacag uruurinta: Finland UNICEF/Maamulka booliska ee oggolaanshaha lacag uruurinta RA/2018/1240 mudada 2019-2020 dalka oo dhan. UNICEF waxaa ay lacagtaas ku caawin doontaa carruurta dalka Malaawi 2019-2020. macluumaad dheeraad ah waxaad ka heleysaa www.unicef.fi/kerayslupa.

